Xuquuqdaada Oo Hoos Imaaneeyso Qodobka Xuquuqda
Isku Darka Itixaadka Iyo Dadka Deggan Minnesota.
(Your Rights Under The Combined Federal and Minnesota Residents Bill of Rights - Somali)

Inta Aadan Akhrin Dukumentigaan Waa Inaad Ogaatid:

Qoraalka dukumentigaan , kalmadda "adiga" waxaa ka mid aha shagsiga adiga, qofka ku matalayo, iyo qof kasta oo sharci ahaan loo magacaabo Minnesota sharcigeeda. Hadaad deggantahay guryaha dadka lagu xanaaneeyo, ama xarumaha xanaanada dheer, xaq baad u leedahay xuquuqahaan. Waxaad kaloo xaq u leedahay hadaad deggan tahay kulleejo ama xarun la deggan yahay oo la ilaaliyo oona leh
barnaamijka ku xirnaanta kiimikada oo leysinka Xarunta Adeega Insaanka Minnesota leh. Xarumaha kuma weeydiin karaan inaad ka tanaasushid xuquuqdaada, shuruud ahaan ineey ku aqbalaan ama
aad sii joogtid.

Xuquuqaha qaarkood waxeey quseeyaan sharciga Minnesota keliya. Xuquuqahaas waxey ku qoran yihiin far aad u muuqata. Xuquuqaha kale oo dhan waxeey hoos imaadan sharciga itixaadka waxeeyna khuseeyaan dadka deggan xarumaha shahaadada u leh barnaamijyada Medicaid ama Medicare. Hadii xaqaada sharciga Minnesota uu u dhigmo xaqaada sharciga itixaadka,

xaqaada itixaada ayaa la soo ban dhigayaa. Wixii kaloo qiime leh ee hoos imaado sharciga gobolka, si kasta, waxaa lagu qoraa far yar-yar.

Hadaad rabtid koobi dhameeystiran ee xuquuqdaada Minnesota, waxaad ka heli kartaa koobiyaal xaruntaada. Qof shaqaalaha ah ayaa kuu sheegi kara meesha aad ka heli kartid

Tayada Noloshada

Xarunta waa ineey kuu xanaaneeysaa heer iyo jawi horumarinayo dayactirka ama sare u qaadayo tayada nolosha.

1. Sharafta. Xarunta waa ineey si edeb leh u horumarisaa oo kuu xanaaneeysaa heer iyo jawi dayactirayo ama horumarinayo sharaftaada iyo muxtiramkaada ayadoo la aqoonsanaayo shaqsiyadaada. **Waxaad xaq u leedahay daaweeyn iyo xanaaneeyn shaqsiyadeed oo khaas ah (ka mid tahay qaddiyadaha laga doodo, la- tashi, baaritaan, daaweeyn, iyo wax qabad nadaafada shaqsiyadeed sida suuliga iyo qubeeyska) marki laga saaro baahida amnigaada iyo caawinaada.**

2. Go'aansiga Shaqsiyadeed iyo Ka Qeeyb-galka. Waxaad xaq u leedahay inaad dooratid wax qabadkaada, jadwalka, iyo xanaanada caafimaadka; aad dhex-geshid xubnaha jaaliyadaada; aad dooratid muuqaalka noloshaada xarunta, ee micnaha kuu leh. **Waxaad xaq u leedahay inaad ka qeeyb gashid wax qabadka iidhehda, diinta,**

siyaasadda iyo kooxaha jaaliyadda, aad ka mid noqotid dad kale, oo u shaqeeynayo ineey horumariyaan xanaanada waqtiga dheer, ayadoo aan la fara gelinin hadii wax qabadka uusan fara gelin xuquuqda khaaska ah ee dadka kale ee meesha deggan.

3. Ka Qeey Galka Kooxaha Reerka iyo Dadka Deggan. Waxaad xaq u leedahay inaad isku-duwdid iyo inaad ka qeeyb qaadatid kooxaha deggan xarunta. Reerkaada wuxuu xaq u leeyahay inuu si khaas ah ugula kulmo xarunta reeraha kale ee dadka deggan xarunta.Marka uu jiro qof deggan ama koox reer ah, xarunta waa ineey dhegeeysataa rayi'ga, oo eey wax ka qabataa dacwadaha iyo talada dadka deggan iyo reeraha ahmiyadooda siyaasadeed eey soo jeediyaan, iyo go'aamada shaqooyinka khuseeynayo xanaanada iyo nolosha dadka deggan xarunta. **Guddiga dadka deggan iyo reeraha waa in lagu dhiiri geliyaa ineey sameeyaan talooyin ku saabsan siyaasadda xarunta.**

4. Ka Qeeyb Galka Wax Qabadyada Kale. Waxaad xaq u leedahay inaad ka qeeyb gashid wax qabad bulshadeed, diineed, iyo jaaliyadeed oo aan fara gelineeyn xuquuqda dadka kale ee deggan xarunta.

5. Diyaafadinta Baahida. Waxaad xaq u leedahay inaad degtid oo heshid adeega xarunta oo diyaafadin macquul ah ee baahidaada iyo doorashaada leh, laga saaro marka caafimaadkaada ama amnigaada ama dadka kale ee deggan xarunta eey dhibaato gelayaan.

Xanaanada iyo Daaweeynta

6. Xanaanada Caafimaadka ee Haboon Waxaad xaq u leedahay daaweeyn haboon iyo xanaaneeyn khaas ah oo ku dhisan baahidaada khaaska ah, loo sawiray ineey ku gaarsiiso heerka ugu sareeya ee shaqada jirka iyo maskaxda, laakiin xaqaan wuxuusa gaareeyn meelaha adeega aana dib loo soo celin karin kheeyraadka bulshadeed ama khaaska ah.

7. Xiriirka Adeegayaasha Caafimaadka kale iyo Qeeybiyaasha. Waxaad xaq u leedahay inaad ka heshid adeeg bixiye dibadda ah, iyo inaad heshid qoraal cadeeynayo bixiyaha markaad codsatid, cinwaankooda, iyo adeega eey qabtaan. Waxaad xaq u leedahay inaad gadatid ama aad ijaaratid qalab ama adeegyo aan ka mid aheeyn sicirka maalintaa ee qeeybiyaha aad dooratay, hadii oo aysan aheeyn sharciga ogolyahay.

8. Xanaanada Socota. Waxaad xaq u leedahay in lagu xanaaneeyo si macquul ah oo caadi ah iyo shaqaale qeeybin socota inta eey siyaasadda xarunta ogoshahay.

9. Dib u Hubinta Macluumaadka iyo Aqoonta Xanaanada. Waxaad xaq u leedahay inaad fiirisid macluumaadkaada oo dhan 24 ssac gudahood marka aad codsatid inaad fiirisid iyo inaad ku gadatid koobiyada sicir aan ka sareeyn midka jaaliyadaada marka aad codsi qoraal u qortid iyo 2 maalmood oo la shaqeeynayo ogeeysiis xarunta. Waxaad xaq u leedahay in si buuxda laguugu sheego luqad aad ku fahmeeysid xaaladda caafimaadkaada.

10. Amarka Horeeya. Waxaad xaq u leedahay inaad heshid war-bixin qoraal oo khuseeysa amarka horeeya **(hadda lagu magacaabo amarka caafimaadka Minnesota)**, ka mid tahayna siyaasadda qoran ee xarunta iyo sharciga gobolka la istacmaali karo, iyo in la qeexo amarka horeeya.

11. Takhtarka Jooga. Waxaad xaq u leedahay inaad dooratid Thakhtarka jooga. Xarunta waa ineey ku siisaa magaca asaga ama ayada, takhasuska, cinwaanka shaqada iyo numbarka teleefonka.

12. War Bixinta Daaweeynta. Waxaad xaq u leedahay in waqti hore lagu ogeeysiiyo xanaanada iyo daaweeynta. **Waxaa dheeraad ah, thakhtarka jooga waxaa laga rabaa inuu ku siiyo war bixin dhameeystiran oo hadda ah oo ku saabsan nooca cudurka, daaweeynta, halista is bedeli karta, iyo saadaalka. War bixintaas waa ineey ahaataa kalmado iyo luqad aad si macquul ah u fahmi kartid. Waxaa kula socon karo kof ka mid ah reerkaada ama qof aad dooratid. Waxaad xaq u leedahay inaad diidid war bixintaas. Haduu ku hayo nooc ka mid ah kanserka naaska, waa in si buuxda laguugu war bixiyaa noocyada kala duwan ee habka daaweeynta iyo halista la socota mid kasta ee hababkaas.**

13.Ka Qeeyb Galka Qorshaha Daaweeynta. Waxaad xaq u leedahay inaad ka qeeyb gashid qorsheeynta xanaanada iyo daaweeynta. **Xaqaas waxaa ka mid ah fursadda**

inaad kala hadashid daaweeynta iyo waxyabaha kale xanaano bixiye shaqsi ah, fursad aad ku weeydiisan kartid iyo inaad ka qeeyb gashid shirka xanaanda caadi ahaan, xaq u leedahay in xubin reerka ka mid ah iyo qof kale ee ku matalo lagu daro. Hadii aadan ka qeeyb geli karin, xubin reerka ka mid ah ama qof kale ee ku matalo aad dooratay waa lagu dari karaa shirkaas.

Hadaadan miyir leheeyn, ama aadan qofna la xiriiri karin xarunta markaad soo geshid, xarunta waa ineey sameeysaa dadaal macquul ah si eey ku ogeeysiiso xubin reerkaada ama qof aad si qoraal ah u dooratay in lala xariiro hadii xaalad deg-deg ah dhacdo, loona ogolaado qofkaas inuu ka qeeyb galo qorshaha xanaanadaada, sida sharciga uu rabo.

14. Ogeeysiiska is Bedelka Xaaladaada. Xarunta waa ineey kaala tashataa adiga isla markaas marka uu jiro shil adiga ku khuseeya, is bedel micna keh ee jirkaada, maskaxdaada, ama xeerka cilmi nafsiga, baahida in la bedelo daaweeyntaada si micna leh, ama go'aan bedelaad ah ama lagaa saaro xarunta. Xarunta waa ineey la xiriirtaa takhtarkaaga, qofka ku matalayo sharci ahaan, iyo xubinta reerkaada.

15. Diidmada Daaweeynta. Waxaad xaq u leedahay inaad diidid daaweeynta. **Hadaad diidid daaweeynta, daawada, ama cunta yareeynta, waa in lagu ogeeysiiyaa waxa dhici kara ee daaweeynta ama natiija maskaxda ee diidmada, ayadoo lagu warbixinayo dinwaanka caafimaadkaaga.**

16. Is Maamulidda Daawada. Waxaad xaq u leedahay inaad keligaa isa siisid daawada hadii kooxda maamusho xarunta eey go'aansato in eey tahay xaalad amni leh.

Xuquuqda Guud

Waxaa xaq u leedahay nolol sharaf leh, go'aan shaqsiyadeed, iyo awood aad kula xiriirtid dad iyo adeegyo xarunta gudaheeda iyo dibadda. Xarunta waa ineey ilaalisaa oo eey hormarisaa xaqaada, ka mid yihiina xuquuqyada hoos ku qoran. **Waa in laguu sheegaa marka laguu ogolaanayo xarunta, inaad leedahay xuquuq sharciyeeysan ee ilaalintaada oo ku sifaysan bayaanka qoraalkaan.**

17. Istacmaalka Xaqaada. Waxaad xaq u leedahay inaad istacmaashid xaqaada sida qof deggan xarunta iyo mauduuc ama qof deggan wadanka Mareeykanka iyo in xaq aan lagaa soo fara gelin karin, jaajuub, midab kala sooc, ama aar gudasho xarunta marka aad istacmaashid xuquuqdaada. Hadii sharciga gobolka kuugu xukumay in aad dhimantahay, xaquuqdaada waxaa kuu istacmaalayo qof ku matalo siduu magacaabay sharciga gobolka. Hadaanan laguugu xukumin inaad dhimantahay, qof kasta oo loo magacaabay inuu ku matalo sharciga gobolka wuuxuu istacmaali karaa xaqaada ilaa inta uu sharciga ogolyahay.

18. Qarsoodiga Shaqsiyeed.Waxaad xaq u leedahay tixgelin kasta ee qarsoodigaada, shaqsi-ahaaneed, iyo

dhaqanka aqoonsiga oo la xiriira bulshadaada, diintaada, iyo caafimaad maskaxeed. Shaqaalaha xarunta waa inee soo garaacan albaabkaada marka eey soo gelayaan, marka laga saaro xaalad deg-deg ah ama xaalad aan la xallin karin.

19. Rasiidka Xuquuqdaada. Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo inta aan ama marka laguu ogolaado xarunta qoraal, ama afka lagaaga sheego luqad aad fahmeeysid bayaan ee xuquuqdaada iyo qaanuunka dhaqayo akhlaaqda xarunta. Waa in aad ku qorataa qoraal akhbaartaan, iyo wixii lagu daro.

20. Akhbaarta Madicaid iyo Medicare. Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo, marka laguu ogolaado xarunta ama marka aad xaq u yeelatid Medicaid, qoraal bayaan ee shayada iyo adeega ka mid ah xarunta xanaaneeynta, ee hoos imaanayo qorshaha Gobolka (oo aan laguugu soo dallaceeyn) ee shay kasta iyo adeeg kasta ee la heli karo (iyo ujrada) oo laguugu soo dallici karo, ka mid tahayna ujrada adeegyada aan Medicare dhiibeeyn ama sicirka xarunta. Waxaad xaq u leedahay in lagu siiyo akhbaar afka ama qoraal ee habka loo codsado iyo istacmaalka Medicare iyo faaii'dada Medicaid, ka mid tahayna xaqaada in aad codsatid degmada eey go'aansato inta raasumaalkaada ee khuseeyndoonta xaq u yeelashada Medicaid, iyo sida lagu heli lahaa dhaqaalihi la soo naqay ee qarashki horay loo dhiibay sida faaii'dada. **Waxaad xaq u leedahay inaad caawinaad ka heshid shaqaalaha xarunta si aad u heshid akhbaarta ku saabsan hadii barnaamijka**

Medicare ama Medicaid eey dhiibeeyso mid ama kulligood adeegyadaan.

Adiga ama keydka khaaska ee koontada laguma dallacayo adeegyada laga dhiibay Medicaid iyo Medicare. Adeega waxaa ka mid ah, adeega xanaaneeynta, adeega cuntada khaaska, barnaamijyada wax qabadka, adeega maamulka guriga iyo dayac-tirka, adeega bushada ee la xiriira daaweeynta, iyo qalabka nadaafadda khaaska iyo adeegyada u baahan baahidaada.

"Shayada nadaafada khaaska iyo adeegyada" waxaa ka mid ah:

- qalabka nadaafadda timaha, shanlo, buraashka timaha, garxiir, iyo saabuunta garxiirka.
- saabuunta khubeeyska, saabuunta jeermi-tiraha ama ku qalabka ku takhasusay nadaafadda oo la dagaalamo dhibaatada xaragga ama jeermiska cudurka dhaliyo.
- rumay, daawada lagu rumaydo, qalabka ilkaha, nadiifiyaha ilkaha,
- subaga jirka la marsado,
- waraq jilicsan ee afka la marsado, suuf koobaaban, suufka takhaatiirta istacmaasho,
- carfiye,
- qalabka xanaaneeynta, waraaqaha nadaafada iyo qalabka la xiriira.
- shukumaan, dharka marista, dharka isbitaalka,
- muqaadiraadka farmasiga laga gato,
- adeega timaha iyo nadafadda cidiyaha,

- qubeesy, iyo
- doobiga khaas ah.

Waxaa laguugu soo dallici karaa qalabka iyo adeega aysan Medicaid iyo Medicare dhiibeeyn, waxaa ka mid ah:

- teleefonka, telefishinka, ama raadiyaha qolkaaga,
- qalabka istareexa, iyo qalabka sigaarka, fikradaha iyo cibaaro, iyo qalabka wax lagu duubo, qalabka qurxinta iyo adeegyada ka badan ee qarashkooda laga dhiibayo Medicaid iyo Medicare,
- dharka khaaska ah,
- qalabka arrimaha akhrinta ee khaaska ah
- hadiyo, ubax iyo geedo
- xaflado bulshadeed iyo madadaalo laguu bandhigay xadka ks baxsan wax qabadka barnaamijka.
- adeeg khaas ah oo xanaaneeynta dahaarneeyn, sida kaaliye khaas ah ama caawiye.
- qol khaas ah, laga saaro marka daaweeyn khaas ah (tusaale ahaan, takoornaan ilaalinta fasaska), iyo
- diyaarin khaas ah ama cabasho cunto kale aan aheeyn cuntada caadiga xarunta laga diyaariyo.

21.Ogeeysiiska suura gelidda inuu kaa khasaaro xaq u lahaanta Medicaid. Hadaad qaadatid manaafaca Medicaid, xarunta waa ineey ku soo ogeeysiisaa marka qarashka koontadaad uu gaaro $200 in ka yar xadka kheeyraadka SSI ee hal qof, iyo, cadadda koontada, markii lagu daro qiimaha kheeyraadkaada kale, uu gaaro xadka kheeyraadka SSI ee

hal qof, waaxaad beeli kartaa xaqa aad u leedahay Medicaid ama SSI.

22.Miisaaniyadda Shaqsiyadeed. Waxaad xaq u leedahay inaad maamushid arrimahaaga dhaqaale, lagamana rabi karo inaad miisaaniyadaada shaqsiyadeed aad dhigtid xarunta. Marka aad qoraal ogolaasho sameeysid, waxaad xaq u leedahay miisaaniyadaada (hadaad ku keeydisid xarunta) in la ilaaliyo oo gooni loo tiriyo. Miisaaniyad shaqsi ee ka badan $50 waa in xarunta eey ku keeydisaa koonto faaii'do leh oo ka duwan koontada shaqeeynayo ee xarunta, faaii'dadana waa in lagu daraa koontadaada. Xarunta waxeey ku hayn kartaa qarashkaaga shaqsiyadeed oo aan ka badneeyn $50 koonto aan faaii'do laheeyn. Dinwanka qarashkaaga waa in la heli karaa marka aad weeydiisatid ama qofka kaa mas'uul aha sharci ahaan, **laakiin waa in lagu siiyaa seddexdii biloodba mar**. Hadaad dhimatid, dhaqaalahaaga iyo xisaabinta ugu dambeeysa waa in la siiyaa 30 maalmood gudahooda qofka ama shaqsiga maxkamadda u dhiibtay inuu maamulo xoolahaaga.

23.Baaritaan Tijaabadeed. Waxaad xaq u leedahay inaad diidid qeeyb galka baaritaanka tijaabadeed.

24.Bedelka qolka ama qofka kula deggan. Waxaad xaq u leedahay in lagu ogeeysiiyo marka qolka ama qofka kula deggan lagaa bedelayo. **Hadii qolkaada la beddelo, waa in qoraal ogeeysiis lagu siiyaa toddobo maalmood ka hor.** Lagaama codsan karo inaad bedeshid qolkaada si aad adiga ama qof kale uu xaq u yeesho manaafaca Medicaid.

25.Qarsoodiga Dinwaanada. Waxaad xaq u leedahay qarsoodi shaqsiyadeed iyo qarsoodi dinwaankaada shaqsiyadeed iyo sheeybaarka. Waad ogolaan kartaa ama diidi kartaa inaad sii deeysid dinwaankaada shaqsiyadeed ama sheeybaarka qof kasta ee xarunta aan ka tirsaneeyn, hadaan xarun kale ee xanaano laguu badalin ama siideeynta dinwaanka uu sharciga codsanayo ama qof seddexaad qandaraaska dhiibayo. **Waa in lagu ogeeysiiyaa marka dinwaan shaqsiyadeed uu codsanayo qof xarunta banaankeed, iyo inaad dooran kartid in uu qof ku raaco marka dinwaanka ama wareeysi mawduuca akhbaarta shaqsiyadeed uu jiro.**

26.Cabasho. Waxaad xaq u leedahay inaad ka hadashi cabashadaada iyo jawaab deg-deg ah ee xarunta eey ku xallinayaan cabashadaada, kuna dhisan sharciga qoran ee habka cabashada ee xarunta **Waad ka hadli kartaa cabasho iyo la talin ayadoo ka xor ah xannibaad, faragelin, jaajuub, midabtakoor, ama aarsasho, ka mid tahayna hanjabaad cayrin ah.**

Waxaad kaloo xaq u leedahay, inaad u qortid cabasho Xafiiska Cabashada Caafimaadka Xarunta, Waaxda Caafimaadka Minnesota, ama Qofka Qaabilsan Dadka Waaweeyn ee Minnesota. Cinwaankooda iyo teleefonadooda waxaad ku arkeeysaa dhammaadka warbixintaan.

27.Jawaabidda Adeega. Waxaad xaq u leedahay jawaab deg-deg ah oo macquul ah su'aalahaaga iyo codsigaada.

28.Baaritaanka Natiijada Indha-indheeynta. Waxaad xaq u leedahay inaad baartid natiijada indha-indheeynta ugu dambeeysa ee xarunta eey sameeyey Dowladda ama baaraha Gobolka ama madaxda caafimaadka iyo qorsha kasta ee saxid oo la hoowlgeliyey, xaruntana khuseeyo, ka helidda akhbaarta wakaaladaha u dhaqmayo macmiil ama u doode, iyo in lagu siiyo fursad in aad la xiriirtid wakaaladahaas.

29.Shaqo. Waxaad xaq u leedahay inaad diidid u shaqeeynta xarunta.

30.Boostada. Waxaad xaq u leedahay wargelin qoraal oo qarsoodi ah, ka mid tahay diridda iyo helidda boostada si deg-deg ah ayadoon la furin iyo inaad heli kartid qalabka wax lagu qoro, adoo iska dhiibi doono qarashka wax lagu dirayo.

31.Helidda iyo Xaqa Booqashada. Waxaad xaq u leedahay inaad si dhaqso ah u heshid wargelin khaas ah sidaan soo socota:

- Qofka kasta oo matalayo dowladda;
- Takhtarkaada;
- Qofka ku shaqa leh xanaanada dheer ee Gobolka **iyo ilaalinta huquuqda kale iyo u doodidda adeega;**
- Wakaaladda mas'uul ka ah ilaalinta iyo nidaamka u doodidda horumarinta shaqsiyada dhiman oo maskaxdooda xanuunsan tahay;

- Reerkaada qofka kuugu dhow ama qaraabada kale, waxeey ku xiran yihiin xaqaada inaad u diidid ama aad dib ula noqotid ogolaashadaadi waqti kasta; iyo
- Dadka kale ee kuugu soo booqanayo ogolaashadaada, ka mid yahay qofka ku matalayo iyo qof kasta ee bixinaya caafimaad, bulsho, sharci, ama adeegyo kale, waxeey ku xiran yihiin xadayn macquul ah iyo xaqaada inaad u diidid ama aad dib ula noqotid ogolaashadaada waqti kasta.

32.Qarsoodiga Xiriirka. Waxaad xaq u leedahay inaad la kulantid oo si qarsoodi ah ula hadashid dadka aad rabtid. **Waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdid xarunta markaad dooratid.**

33.Teleefonka. Waxaad xaq u leedahay inaad heshid si caadi ah istacmaalka meel khaaska ah teleefonka adoona teleefonkaada la maqleeyn.

34.Hantida Shaqsiyadeed. Waxaad xaq u leedahay inaad heeysatid oo aad istacmaashid waxyaabaha khaaska kuu ah sida alaabta qaarkeed ee guriga ama dharka kuu haboon hadii booska uu deeqo, hadeeyna dhibaateeyneeyn xuquuqda dadka kale, caafimaadkooda iyo amnigooda. **Xarunta waa ineey leedahay bakhaar dhexe oo qufulan ama eey siisaa bakhaar qufulan qof kasta, si aad ugu xareeysid alaabta qiimaha leh.** Xarunta ayaa ka mas'uul ah ka-hortag macquul ah, sida la talin adiga ama xubnaha reerkaada halista macquulka ah ee keenidda qalab khaas ah ee qiimo leh xarunta, fiican inaad calaamadeeysid

alaabtaada, inaad albaab u leedahay armaajo kasta, iyo inaad baartid wixii dhuma ama hallaabo. **Xarunta waxaa laga yaabaa, laakin qasab kuma aha, ineey mag siiso wixii kaa dhumo ama lagaa xado.**

35.Dadka Deggan oo Is Qabo. Waxaad xaq u leedahay inaad la qeeybsatid qolka xaaskaada haduu xaska ogolyahay. **Hadaad wax qabtid, waxaad xaq u leedahay booqasho khaas ah ee xaaskaada.**

Dabeecadooda Qofka Deggan iyo Xarunta Wax-qabadkeeda

36.Xannibaada. Waxaad xaq u leedahay inaad xor ka ahaatid wixii xannibaad jirka ama kiimika ah ee laguugu xukumay edeb daraadeed ama sahalsanaan oo aan loo baahneeyn si loo daaweeyo calaamadaha caafimaadka qofka deggan, **laga saaro xaaladaha deg-degga ee qoran, ama ogolaasho qoraal leh marka ka dib uu ku baaro takhtarkaada waqti go'an, iyo marka loo baahdo in lagaa ilaaliyo inaad shil keligaa ama dadka kale u keentid.**

Xannibaada Sharciga Luqadda ee lagu darayo MHHA's Isku Darka Sharciga Xuquuqda Guryaha Xannaanada.

37.Xaqa Weeydiisashada iyo Ogolaashada Xannibaada Jirka. Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid xannibaad jireed si loo daaweeyo calaamado caafimaad. Inta aadan

ogolaan, xarunta waa ineey kuu micneeysaa halista ku jirta iyo xanaaneeynta kale ee jirta. Takhtarkaada waa inuu amraa xannibaada, uu aqoonsadaa calaamadaha caafimaadka, uuna cadeeyaa duruufaha xannibaada la istacmaali karo. Calaamadaha caafimaadka waxaa ka mid noqon karo ahmiyad amniga jirkaada, baahidaada jirka ama maskaxda, ama cabsida dhicitaanka. Xarunta way ilaalisaa istacmaalka xannibaada jirka si eey u ilaaliso caafimaadkaaga iyo amnigaada. Marka lala tashado adiga, rerkaada, iyo takhtarkada, xarunta muddo kala duwan waxeey qiimeeysaa baahidaada xannibaada. Waa inaad saxiixdaa foom ogolaashada xannibaada. Hadaad go'aan ka gaari kartid xanaanada caafimaadkaada, adiga keliya ayaa codsan karo oo ogolaan karo xannibaada. Hadaadan go'aankaa gaari karin, xubnaha reerkaada, ilaaliye, daryeele, ama wakiilka xanaanada caafimaadka ayaa codsan karo oo ogolaan karo xannibaada. [Hadaad u baahatid koobi ee sharciga cusub ee gobolka ee ku siinayo xaqaan, waa **Xaqaada ee Sharciga Dadka Deggan Minnesota**, ee aad ka heli kartid xaruntaada. Qof ka shaqeeyo xarunta ayaa kuu sheegi karo meesha aad ka heli kartid.]

38.Xad Gudub. Waxaad xaq u leedahay inaad xor ka noqotid xad gudubka hadalka, galmada, jirka, ama maskaxda, lagu garbaasho, iyo cidleeyn aadan ogoleeyn, **ka mid tahayna macaamilid xun sida lagu cadeeyey sharciga ilaalinta dadka waaweeyn.**

39.Xanaaneeynta Shaqaalaha ee Dadka Deggan. Waxaad xaq u leedahay in shilalka xad gudubka ama

dayactirka ama dhaawac aan la garaneeyn meeshuu ka yimid in la baaro, waxna laga qabto si sax ah. Waxaad kaloo xaq u leedahay in aad u qortid dacwo wakaaladaha ku qoran liiska dhammaadka warbaahintaan.

Ogolaashada, Bedelka iyo Xuquuqda Siideeynta

40. Bedelka iyo Siideeynta. Waxaad xaq u leedahay inaad joogtid xarunta oo aad diidid bedelka ama siideeynta hadii-aysan:

1. Bedelka ama siideeynta waxeey muhiim u yihiin daryeelkaada iyo hadii baahidaada xarunta waxba ka qaban karin;
2. Bedelka ama siideeynta waa muhiim sababtoo ah caafimaadkaada si kaafi ah ayuu u fiicnaaday, adeega xaruntana uma baahnid;
3. Amniga shaqsiyada xarunta halis buu ku jiraa;
4. Caafimaadka shaqsiyada ku jira xarunta halis beey ku jirtaa;
5. Waad ku guul-darrootay, ka dib markii si macquul laguu ogeeysiiyey, inaad dhiibtid(ama lagaaga dhiibo Medicare ama Medicaid) joogtaankaada xarunta; ama
6. Xarunta waxeey joojisey ineey shaqeeyso

Marka xarunta ku bedesho ama ku siideeyso ariimahaan daraadood oo lagu soo cadeeyey (1) ilaa (5), dinwaanka sheeybaarkaada waa in lagu qoraa. Qoritaanka waa inuu sameeyaa takhtarkaada marka bedelid ama siideeyn loo

baahan yahay (1) ama (2) iyo takhtar kasta marka bedelid ama siideeyn loo baahan yahay (4).

Inta xarun eey ku bedelin ama ku siideeyn, xarunta waa ineey ku soo ogeeysiisaa, hadii la yaqaano, xubin reerka ama qofka sharci ahaan ka mas'uul ah bedelidda ama siideeynta iyo sababaha, ku dinwaan geli sababaha dinwaanka sheeybaarkaada, oo ku lifaaq ogeeysiiska:

(a) Taariikhda bedelidaada ama siideeynta;
(b) makaanka aad tageeysid;
(c) Magaca, cinwaanka, iyo numbarka teleefonka ee Gobolka iyo qofka ka mas'uul ah xaaanada dheer ee qeeybtaas;
(d) hadaad qabtid curyaanimada koritaanka, cinwaanka boostada iyo numbarka teleefonka wakaaladda ka mas'uul ah ilaalinta iyo u doodidda dadka qabo curyaanimada koritaanka;
(e) hadaad maskaxda ka jirran tahay, cinwaanka boostada iyo numbarka teleefonka wakaaladda ka mas'uul ah ilaalinta iyo u doodidda dadka qabo jirrada maskaxda;
(f) magaca iyo cinwaanka xafiiska wakaaladda gobolka ka mas'uul ah racfaanka go'aamada bedelidda iyo siideeyntaada, **iyo**
(g) **bayaan inaad xaq u leedahay in aad ka muddacdid ama racfaantid bedelidda iyo siideeynta.**

Ogeeysiiska bedelidda ama siideeynta waxaa la sameeyn karaa sida ugu dhow ee la qaban karo marka bedelidda ama siideeynta sababteeda eey tahay (1) ilaa (4) ka kore ama aadan deggeneeyn xarunta 30 maalmood. Xaaladaha kale,

ogeeysiiska waa in la sameeyaa ugu yaraan 30 maalmood ka hore inta aan lagu siideeyn ama lagu bedelin. **Waxaad dooran kartaa inaad meel kale u guurtid inta uu waqtiga ogeeysiiska dhammaan. Hadii xarunta eey rabto ineey kuu wareejiso qol kale, waa in lagu siiyaa ogeeysiis 7 maalmood kahor. Waqtiga ogeeysiiska waaxaaa la soo gaabin karaa xaaladaha ka baxsan xukunka xarunta, sida dejinta dadka cusub ee soo degayo xarunta iyo isbedel daaweeyntaada iyo barnaamijka xanaaneeyntaada. Xarumaha waxaa laga rabaa ineey sameeyan dadaal macquul ah si eey dejiyaan dadka cusub aygoon carqaladeeyn qeeybinta qolalka.**

Waxaad xaq u leedahay is diyaarin iyo jihaayn kuugu filan si loo hubsado bedelidda iyo siideeynta xarunta oo amni iyo toosnaan leh.

41. Ogeeysiiska Siyaasadda Sariir-Celinta iyo Dib u Ogolaashada. Hadaad u bedeletid isbitaal kale ama aad u maqnaatid daaweeyn, waxaad xaq u leedahay inaad ku soo noqotid xarunta siyaasadda sariir-celinta ee qorshaha Medicaid ee Gobolka hadaad ku jirtid Medicaid, iyo siyaasadda xarunta ee sariir-celinta hadaadan ku jirin Medicaid. Xarunta waa ineey ku siisaa koobiga siyaasadooda marka aad bedeletid ama daaweeyn u maqnaatid

Xarunta xaanaaneeynta waa ineey raacdaa siyaasadda qoran ee dib laguugu ogolaanayo sariirta ugu horeeyso ee banaan ee qolka aan keligaa khaas kuu aheeyn hadaad

rabtid adeegaga xarunta oo aad xaq u leedahay Medicaid, oo uu kaa dhamaatay jiifka isbitaalka ama fasaxa maalmaha daaweeynta ee qorshaha Gobolka.

42. Helidda Loo Simanyahay ee Xanaanada Wanaagsan. Xarunta waa ineey aasaastaa oo eey heeysaa siyaasad isku nooc ah ee loo simanyahay iyo wax qabadka ku saabsan bedelidda, siideeynta iyo adeegyada hoos imaanayo qorshaha Gobolka ee shaqsi kasta ayadoon ku xirneeyn qarash dhiibidda. Gobolka shardi kuma aha inuu siiyo adeeg badan ee qof deggan xarunta, mid ka baxsan adeegyada qorshaha Gobolka uu ogolyahay.

Dadka kale ee Fulin Kara Xuquuqdaada Ilaaliyahaaga ama daryeelaha ama, haduu maqan yahay ilaaliyaha ama daryeelaha, qof ahmiyad siinayo, ayaa fuliyn karo xuquuqdaada asagoo ku matalayo. Qof ahmiyad siinayo wuxuu kaloo raadin karaa inuu fuliyo xuquuqahaan asagoo ku matalayo hadaad leedahay ilaaliye ama daryeele ka socda maamulka wakaaladda ama maxkamadda kuugu qortay ama degmada eey leedahay awooda ilaalinta ama daryeelidda. Wixii ka soo baxa nidaamka fulintaas ayeey xarunta xanaanada caafimaadka, ayadoo aaminsan, raaci doonta tilmaan-bixinta ilaaliyaha ama daryeelaha. Waa ahmiyadda sharcigaan in aan lagu xad gudbin xuquuqdaada shacbiyadee iyo diimeed, ka mid tahayna xuquuqda inaad go'aan gaartid si xor ah iyo inaad ogtahay fursadaha kuu furan, xaruntana waa ineey dhiiri

gelisaa oo caawisaa sida suuroowda fahanka iyo istacmaalka xuquuqyadaan.

Baaritaanka iyo cabashada ku saabsan xanaanada daaweeynta ama sharciga xuquuqda bukaan-socodka waxaad u jeedin kartaa:

Kheeyradka

Ombudsaman for Older American
Metro Square Building
121 East Seventh Place, Suite 410
St. Paul, MN 55101
1-800-657-3591 ama (651) 296-0382 (metro)

Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970
1-800-369-7994 ama (651) 215-8702

Minnesota Department of Health
Facility & Provider Compliance Division
85 East Seventh Place, Suite 300
St. Paul, MN 55101
(651) 215-8700

The Development Disabled Advocacy Project
The Mental Health Law Project
430 First Avenue North, Suite 300
Minneapolis, MN 55401-1780

1-800-292-4150 ama (612) 332-1441 (metro)

Board of Medical Practice
2829 University Avenue SE, Suite 400
Minneapolis, MN 55414-3246
(612) 617-2130

Surveillance & Integrity Review Service
(Medicaid Fraud Control)
Minnesota Department of Human Services
444 Lafayette Road
St.Paul, MN 55155-3851
1-800-657-3705 ama (651) 297-2082 (metro)
[Waa inaad ka tagtaa fariin]

Qoraalkaan waxaa sameeyey Caafimaadka Minnesota iyo Isbaheeysiga Guryaha.
Turjumaadaan waxaa maalgeliyey Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Hadaad u baahan tahay akhbaarta turjumaadaan, fadlan la xiriir Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (651) 215-8700.